Ilaahay ma eegayo Sawiradiina iyo Xoolahiina, laakiin wuxuu eegayaa Quluubtiina iyo Camalkiina

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Ilaahay ma eegayo Sawiradiina iyo Xoolahiina, laakiin wuxuu eegayaa Quluubtiina iyo Camalkiina ".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay uusan eegayn Sawirada dadka iyo Jirkoodu, inay Quruxsan yahay ama Fool xun yahay ama wayn yahay ama yar yahay ama caafimaad qabo ama jiran yahay. Ilaahay ma fiirinaayo Hantidoodu, ma badan tahay mise way yar tahay? Ilaahay casa wajala uma qabanaayo oo ku xisaabin maayo arimahaas sida ay ugu kala duwan yihiin, laakiin wuxuu eegayaa Quluubtooda iyo waxa ku jira ee Taqwo, Yaqiin, Run, iyo Ikhlaas ah, ama inuu u sameeyey is tustus iyo halagaa sheego, Ilaahay wuxuu eegayaa camalkoodu inuu fiican yahay iyo inuu xun yahay, taasuuna ku ajar siin kuna abaal marin.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/4555